

Somali | Soomaali

Talaado 11-ka Maarsó 2025

**War soo kordhay oo muhiim ah oo ku saabsan tillaabooyinka xiga ee khuseeyaa
12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road**

Waxaan rabnaa inaan kula socodsiino wixii kusoo kordha marxalad kasta oo dib u dhiska ah. Warqadaan waxaa qeyb ka ah macluumaad ku saabsan:

- Qorshahayaga ah inaan Flemington ka dhisno guryo ka tiro badan kana tayo wanaagsan kuwii hore
- Halka laga heli karo shaqaalaheena
- Halka aad ka heli karto xog badan oo ku saabsan dib u dhiska

Maalmaha la sooman yahay ee Ramadaanka

- Waxaan fahamsan nahay oo aan ixtiraamnaa in qaar badan oo bulshadeenna ah ay hadda sooman yihiin.
- Waxaan qaban doonaa kulamo xog-wadaag ah oo ku saabsan tallaabooyinkan soo socda bisha Abriil (Ramadaanka ka dib).
- Waraaqo ayaa lagu dhejin doonaa meelaha laga soo galoo dhismaha kuwaas oo ay ku qoran yihiin taariikhaha iyo waqtiyada la qaban doono kalfadhiyadan.
- Haddii aad qabto wax su'aal ah hadda, shaqaalahayagu waxay ku sugnaan doonaan Djerring Hub Arbacada 12-ka Maarsó 9:00 subaxnimo ilaa 5:00-ta galabnimo.

**Iskaan garee
si aad u hesho
macluumaad ku
qoran luuqadaada**



Way mahadsan yihiin dhamaan inta fikradahooda nala wadaagtay bishii Diseembar

Waa uu mahadsan yahay qof kasta oo nala wadaagay ra'yigooda iyo fikradooda ku aadan mustaqbalka Flemington taas oo qeyb ka ahayd xiriirada bulshada lala sameeyay bishii Diseembar.


Ra'yigaagu wuxuu wax ku biirin doonaa naqshadaha dhismayaasha cusub iyo goobaha bulshada.

- 290 kireyste ayaa nala wadaagay fikradahooda ku aadan waxa muhiimka u ah marka laga hadlayo guryaha mustaqbalka, goobaha bulshada iyo xaafadaha.

- Wuxaan maqalnay ra'yigiina ku aadan baahida loo qabo in la dhiso dhismayaal cusub iyo meelo banaan oo dibeda ah oo ammaan ah, oo si wanaagsan loo nashqadeeyay isla mar ahaantaasna diirada saaraya bulshada.
- Wuxaan sidoo kale maqalnay baahida loo qabo in la bixiyo guryo loogu talagalay qoysaska nooc kasta leh.

Wuxaan ku casunay Bulshooyinka Dhismaha (Building Communities) inay soo gudbiyaan qorshe loogu talagalay dib u dhiskan

Bulshooyinka Dhismaha (Building Communities) waa koox mashruuc oo aan faaiido doon ahayn oo khibrad u leh dhismaha iyo maaraynta guryaha kirada ah ee bulshada, kuwa la awoodi karo iyo guryaha suuqa ee kirada ah.



Guryo cusub, oo korontada dhaqaaleynaya oo laga dhisay Victoria Street, Flemington, ayaa la furay 2024.

Bulshooyinka Dhismaha (Building Communities) waxay dhameystireen guryo cusub oo ku yaal Victoria Street waxayna hadda guryo cusub ka dhisayaan Holland Court, Flemington.

Wuxaan weydiisanay Building Communities inay soo bandhigaan soo jeedin lagu dhisayo laguna maamulayo wadar dhan 700 oo guri oo cusub, oo ay ku jiraan 400 guri oo guryaha bulshada ah, oo ku yaalla 12 Holland Court iyo 120 guri oo aaga Racecourse Road ah. Dhulka oo dhan waxa uu ahaan doonaa mid bulshadu wada leedahay.

Marka aanu mashqruucan la kaashano dad kale, waxaan awoodnaa inaan dadka reer Victoria siino guryo casri ah, oo si wanaagsan loo qaabeeyey isla mar ahaantaasna korontada dhaqaaleynaya, kana ag dhow dugsiyo, adeegyo iyo gaadiid.

Fursado badan oo aad ra'yigaaga ku dhiibban karto

Inta naqshadeynta dhismayaasha cusub iyo meelaha bulshada la diyaarinayo, waxaa sii jiri doona fursado lagu arki karo naqshadaha oo lagu soo gudbin karo ra'yiga.

Halka laga heli kooxdayada

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad jeceshahay inaad la hadasho kooxdayada, waxaan ku sugnaan doonaa Djerring Hub Arbacada 12-ka Maarsa 9:00-ka subaxnimo ilaa 5:00-ta galabnimo

Wuxaan rabaa inaan barto intaas ka badan

Booqo: <https://bighousingbuild.homes.vic.gov.au/precincts/flemington-precinct> wixii macluumaaad iyo warar cusub ah oo ay ku jiraan kuwo ku qoran luuqadaada

www.homes.vic.gov.au



@homesvic

